**Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare Kacaanka**

**14 Feberaayo 1970, lamba. 40**

**Magacaabida Garsooraha Gobolka ee Garsooraha Suudaanta Cisaddin Xasan Cabdiraxmaan.**

**GUDDOOMIYAHA**

**GOLAHA SARE KACAANKA**

Marka uu arkay Xaashida Koobaad Kacaanka;
Marka uu arkay Xeerka 21 Oktoobar 1969, lamba.1;
Marka uu arkay qod. 35 ee Dekereetada Baarlamaanka 12 Juun 1962, lamba. 3 kun ee Xeerka Nidaamlka Garsoorka;
Marka uu arkay qod. 6 e 15 Agoosto 1966, lamba. 14;
Marka uu arkay Dekereetada 25 Oktoobar 1969, lamba. 12, ee Golaha Sare Kacaanka;
Marka uu garowsaday baahida loo qabo in la magacaabo Garsoore Maxkamad Goboleed ee Garsooraha Suudaanta ah ee Cisaddin Xasan Cabdiraxmaan;
Marka uu arkay go'aanka Golaha Wasiirada;
La dhagaystay tala soo jeedinta Golaha Sare Kacaanka;
Tala ay uu ku soo jeediyay Wasiirka Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Shaqada;

**WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA**

**Qod. 1**

Mudane Cisaddiin Xasan Cabdiraxmaan, Garsooraha dalka Suudaan waxaa loo magacaabay Garsoorha Maxkamadda Gobolka Hargeysa isago qabanaya xilka garsoorinmo.

**Qod. 2**

Dekereetadaan si deg-deg ayay u dhaqangalaysaa.

Muqdisho, 14 Feberaayo 1970.

Guddoomiyaha

Golaha Sare Kacaanka

**Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre**

Wasiirka Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Shaqada

**Dr. Osmaan Nur Ali**

La hubiyay lana Diiwaangeliyay – Diw. lamba. 1, bogga lamba. 98.

Muqdisho, 14 Feberaayo 1970.

Hantidhowraha Guud: **Maxamuud Ciise Salwo**